

Somali

# Amiiraddii digirta ku jiifsatay

- Sheeko laga keenay Danmark





Baribaa waxaa jiray nin amiir ah. Wuxuu rabay amiirad, laakiin wuxuu rabay inay ahaato amiirad sharaf leh. Sidaa d arteed, wuxuu u safray adduunka oo dhan si uu u raadiyo, laakiin meel kasta waxbaa ka hor imaanayey.



Waxaa jiray amiirado badan, laakiin inay ahaayeen amiirado sharaf leh isagu ma uusan ogoon karin, marwalba waxbaa khaldanaa.

Sidaa darteed wuxuu gurigii yimid isagoo murugooday, maxaa yeelay wuxuu runtii doonayay amiirad dhab ah.



Maalin maalmaha ka mid waxay jirtay cimilo aad u xun oo leh hillaac, onkod iyo roob badan, oo la garaacday i ridda magaalada. Boqorkii weynaa wuxuu aaday iridii si uu u furo. Waxaa banaanka taagneyd amiirad.




Laakiin umay muuqan inay amiirad tahay.

Waxay ahayd mid qoyan oo wasakh ah roobka dartiis biyo ayaa hoos uga da'ayey dharkeedii iyo kabaheedii.



"Haa, waan ogaan doonaa!" ayay ku fekertay boqoradii weynayd. Boqoradii waxba ma aysan oran, laakiin waxay gash ay qolka hurdada oo waxay dhigtay digir sariirta halka ugu hoosaysa. Ka dib waxay qaaday labaatan furaash iyo labaatan buste waxayna dul saartay digirta dusheedii. Halkaas ayay amiiraddu ku Seexan lahayd habeenimada.





Aroortii ayaa boqoradii iyo boqorkii weydiiyeen sida ay ku seexatay.



"Haa, waxay ahayd wax aad u xun!" ayey tiri amuuraddii, "xalay oo dhan hurdo yari iga iman! Waxay dareentay inay wax sariirta ku jireen. Wuxaan ku jiifsaday wax adag, sidaa darteed wuxaan ahayd jaale iyo buluug jidhkaya oo dhan! Waa wax aad u xun! Kadib waxay arkeen inay tahay amuurad sharaf leh, maadaama labaatan furaash iyo labaatan buste ay ka dhix dareentay digirtii.



Kaliya amiirad dhab ah ayaa sidaa u dareen badan. Amiirkiina wuxuu u aqbalay amiiraddii inay xaaskiisa noqoto, maxaa yeelay hadda wuxuu ogaaday inay tahay amiirad dhab ah.



Digirtiina waxaa la dhigay bandhig halkaas oo ilaa maanta la arki karo haddii aan cidina qaadan.



Finn flere fortellinger på [morsmal.oslomet.no](http://morsmal.oslomet.no)

Fortellingen er laget med figurer og tegninger fra Aursmoen barnehage